

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA, <i>E-mail: Garyaqaankaguud@gmail.com</i>		
Sanadka: 2aad	Cadadka: 4aad ee April	Taariikh: 04/05/2013
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii kastaba SL. Sh.		

TUSMADA CADADKA

<p><u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:</p> <p>1) SOOMA BIXIN</p> <p><u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:</p> <p>2) CAFIS MADAXWEYNE, <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0306/042013</u></p> <p>3) WAREEGTO MADAXWEYNE, Kheyraadka Dabiiciga ah</p> <p>4) WAREEGTO MADAXWEYNE, Soo Ururinta iyo libinta Iskaraabka Dalka.</p> <p><u>QAYBTA SADEXAAD:</u> DIGREETOYINKA, WAREEGTOYINKA, AMARADA & XEER NIDAAMIYAYAASHA WASHIRADA, IWM</p>	<p>448</p> <p>449</p> <p>451</p>
--	----------------------------------

5) SOOMA BIXIN

QAYBTA AFRAAD: AMARADA & GO'AANADA MAAMUL



- | | |
|--|-----|
| 6) Maxkamada Gobolka M/Jeex
Amar Madaxbanaaneyn Dhul | 453 |
| 7) Maxkamada Gobolka M/Jeex
Amar Madaxbaaneyn Beer | 457 |
| 8) Maxkamada Gobolka M/Jeex
Amar Xayiraad Guri | 460 |
| 9) Maxkamada Gobolka M/Jeex
Naado Xaraash Laba Baabuur | 462 |
| 10) Maxkamada Sare JSL
Dhaarin Mudane | 463 |
| 11) Maxkamada Sare JSL
Dhaarin Mudane | 464 |
| 12) Maxkamada Sare JSL
Amar Xayiraad Guri | 465 |
| 13) Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan
Gelin Shirkada TAYO-STAR
CONSTRUCTION AND CONTRACTING
COMPANY) | 468 |
| 14) Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan
Gelin Shirkada HIRSI LTD COMPANY) | 470 |
| 15) Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan
Gelin Shirkada GALAD CONSTRUCTION
AND CONTRACTING COMPANY) | 471 |
| 16) Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan
Gelin Shirkada OCEANIC SHIPPING
AGENCY) | 473 |
| 17) Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan
Gelin Shirkada AL-KHAYR FISHING
COMPANY) | 474 |
| 18) Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan
Gelin Shirkada TAWFIQ GENERAL
TRADING COMPANY) | 475 |
| 19) Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan
Gelin Shirkada EAST AFRICA CASING
COMPANY) | 477 |
| 20) Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan
Gelin Shirkada SAWA INTERNATIONAL
COMPANY) | 478 |

QAYBTA SHANAAD: **DGEYSIISYADA**
Sooma bixin



QAYBTA LABAAD:
XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-1682/042013

01/04/13

XEER MADAXWEYNE Lr:0306/042013

Cafis Madaxweyne

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xubintiisa
5aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda
Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 149aad ee Xeerka
Ciqaabta Guud;
- Markuu Arkay: Qoraalka codsiga ah ee
Wasiirka Wasaaradda
Madaxtooyadda;
- Markuu Tixgaliyay: Qoraalka codsiga ah
ee Suldaan Bare Xaaji
Xuseen Caraale.
- Markuu La Tashaday: Masuuliyiinta ay
arrintani khusayso

Wuxuu Go'aansaday

In laga bilaabo taariikhda maanta uu cafis gaar ahaaneed u fidiyo Maxbuus Nadra Maxamed Jaamac.



Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/WM/222-1689/042013

07/04/13

Ku: Dhamaan Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Madaxa-
bannaan ee Dawladda
Ku: Maamullada Gobollada iyo Degmooyinka
Ku: Ciidammada Kala Duwan ee Jamhuuriyadda
Somaliland

Ujeedo: Wareegto Madaxweyne; Khayraadka Dabiiciga ah

Mudaneyaal iyo Marwooyin,

Xukuumaddu waxay xil mug iyo miisaan leh iska saartay sidii loo manaafacaadsan lahaa Khayraadka dabiiciga ah eek u duugan Dalka. Sidaas awgeed, sida aad ka warhaysaan waxaaa dalka ka socda baadhitaanno lagu sahaminaayo Khayraadka ku jira Dalka;

sida shidaalka iyo Saliidda, kawaas oo ka mid ah hantida guud ee Dalka.

Sida ku xusan Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland Qodobka 12aad, Faqradiisa 4aad, khayraadka Dabiiciga ah ee Dalka waxa mas'uul ka ah Dawladda-dhexe, waxaanay qaadaysaa tallaabo kasta oo suurtagal ah si loo baadho, loogana faa'iidaysto Khayraadka ku jira berriga iyo badda. Bulshada Somaliland waxa lagu wargelinayaa inay ilaaliyaan habsami-u-socodka shaqada, Lana shaqeeyaan Hay'addaha Dawladda ee Shaqada ku hawlan.

Haddaba, waxa aan farayaa Hay'addaha ay wareegtadani khusayso, inay tallaabo sharci ah ka qaadaan cida kasta oo ka hor-timaadda, isku-dayda dhaq-dhaqaaq diidmo oo beelaysan, deegaamaysan iyo abaabul kasta oo nabadgelyada ka dhan ah.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND



THE PRESIDENT



JSL/M/WM/222-1694/042013

07/04/13

- Ku: Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Gaadiidka Hargeysa
Ku: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha Hargeysa
Ku: Wasiirka Wasaaradda Ganacsigga Hargeysa
Ku: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Hargeysa
Ku: Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga Hargeysa
Og: Guddida Qandaraasyada Qaranka Hargeysa

Ujeeddo: Wareegto Madaxweyne; Soo Ururinta iyo libinta Iskaraabka Dalka

Mudaneyaal iyo Marwooyin,

Iskaraabka Dalku waxa uu ka mid yahay hantida guud ee Dalka, waxaana mas'uul ka ah Dawladda-dhexe sida ku tilmaaman Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland Qodobka 12aad.

Dawladda-dhexe ayaa xilka saran yahay qorshaynta iyo in sida ugu habboon looga faa'iidaysto Iskaraabka. Haddaba, waxa aan farayaa Wasaaraddaha ay wareegtadani sida tooska ugu socoto inay guddi farsamo u saran soo ururinta dhammaan iskaraabka Dalka.

Sidoo kale, waxa aan farayaa Guddida Qandaraasyada Qaranka inay qiimeeyaan iskaraabka, mariyaanna nidaamka qandaraasyada Qaranka, isla markaana u bandhigaan suuqa xorta ah (Tartan xor ah iyo qandaraas furan), iyaga oo la-kaashanaya Wasaaraddaha hawshan ku hawlan.

Sidaas darted, dhamaan wixii dhaqaale ka soo baxa waxa lagu maalgelin doonnaa qasnadda Dawladda, iyada oo la raacayo hab-maamulka Wasaaradda Maaliyadda.

FIIRA-GAAR AH: wixii dhaqaale ka soo baxa Markabka yaala Dekedda Lughaya, waxa si gaar ah loogu horumarin doonnaa Dekedda Lughaya, waxaanna la Marin doonnaa iibintiisa nidaamka aan kor ku soo xusay.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA AFRAAD:
AMARADA & GO'AANADA MAAMUL

JAMHUURIYADDA SOMAALILAND



REPUPLIC OF SOMALILAND



MAXKAMADDA GOBOLKA M/JEEX

REGIONAL COURT M/J HARGEISA

MGH/DFL/162/10

HARGEYSA

01/04/2013

KU:- Taliyaha Qeybta Booliska Galbeedk =Hargiesa=

Ku:- Guddomiyaha Degmada Ib/Koodbur=Hargiesa=

OG:- Duqa Caasimada Hargeysa =Hargiesa=

OG:- Loo Fuliyaha Xasan Cabdi Xasan Xaad

(Qareen:- Max'd Cali Jamac)

OG: - lagu Fuliyeyaal

1. Axmed Xuseen Ismaacil =Hargiesa=
2. Caasha Axmed Ismaacil =Hargiesa=
3. C/Raxmaan C/Laahi Xasan =Hargiesa=
4. Maxamuud Ibrahim Faarax =Hargiesa=

Ujeedo:- Amar U Madax Banaanayn Dhul

Maxkamada Gobolka Hargeysa:-

Markay Aragtay: Galdacwadeedka Fulinta ah ee ku suntan MGH/DFL/246/12, ee 24/11/012. Kana dhexeeya dhinacyada sare ku xusan ujeedadiisuna tahay fulin Xukun Maxkamadeed.

Markay Aragtay: Arjiga Codsiga Madax Banaanayn Dhul ee uu Maxkamada u soo gudbiyey Loo Fuliye Xasan Cabdi Xaad eek u taarikhaysan 19/11/012 ujeedadisuna yahay Codsiga Madax Banaanayn Dhulka Cabirkiisu dhan yahay 48X36Mtr, kuna yaal Degmada Ib/Koodbuur Xaafada Jig Jiga Yer Qeybta (J), Jihooyinkiisuna kala yihiin sidan:W/K/Bari==Waddo, Galbeed--Dhisme

Marakay Aragtay: Xukunka Maxkamada Gobolka Hargeysa eek u suntan MGH/DML/220/2004, ee 1/11.05, uguna xukuntay dhulka cabirkiisu yahay 48X36Mtr, eek u yaal Degmada IB/Koodbuur Xaafada Jig-Jiga Yer Qaybta (J), soohdimhiisuna kala yihiin sidan:-W/K/Bari==Waddo, Galbeed—Dhisme, Dacweysanyaasha kala ah :

1. Axmed Xuseen Ismaacil
2. Caasha Axmed Ismaacil
3. C/Raxmaan C/Laahi Xasan
4. Maxamuud Ibrahim Faarax

Kana Xukuntay Dacwoode: Xasan Cabdi Xaad

Markay Argaty:- xukunka Maxkamada Racfaanka ee Sumadiisu tahay MRH/DML/61/06, ee 21/06/2012, kaas oo ay ku laashay Xukunka Maxkamada Gobolka Haragysa ee sumadiisu tahay MGH/DML/220/04, ee 01/11/05, uguna xukuntay Racfaanle Xasan Cabdi Xaad dhulka Cabirkiisu yahya 48X36Mtr, jihooyinkiisuna yihiin Galbeed = Dhisme, W/K/Bari Waddo, kuna yaala Degmada Ib/Koodbuur Xaafada Jig-Jiga yer Qeybta (J), lehna Fayl Number (11231), kuna Xukuntay Racfaansanyaasha kala ah:

1. Axmed Xuseen Ismaacil
2. Caasha Axmed Ismaacil
3. C/Raxmaan C/Laahi Xasan
4. Maxamuud Ibrahim Faarax

Makay Aragtay: - Qodobada 338, 429, 350, 351, XHM.

Markay Aragtay: - Asabaabaha kor ku xusan oo dhan awgeed waxay Maxkamdda Gobolka Hargaysa soo saartay Amarkan u Madax-Banaanaynta Ah.

Amar U Madax- Banaanayn Dhul

1. Maxkamada Gobolka Hargaysa waxay u Madax Banaanaysay Dhulka Cabirkiisu yahay 48X36Mtr, ee ku yaal Degmada Ib/Koodbuur Xaafada Jigjiga Yer Qeybta (J) Jihooyinkiisuna kala yihiin W/K/B/Waddo, G/Dhisme, Loo Fuliye: - Xasan Cabdi Xaad. Inuu dhulkiisa uu dhisan karo, ibin karo, Rahmi karo, Hibeyn karo sifo kasta oo uu sharcigu ogolyahayna u isticmaali karo laga bilaabo Maanta 01/04/2013.
2. Maxkamada Gobolka Hargeysa waxay Taliyaha Qeybta Galbeed Hargeysa Amraysaa inuu u Madax Banaaneeyo kuna wareejiyo Loofuliye Xasan Cabdi Xaad Dhulka Cabirkiisa iyo jihooyinkiiso kor ku xusan yahay.
3. Waxa kale oo lagu Amrayaa Taliyaha Qeybta Galbeedka Hargeysa inuu Sharciga horkeeno cidlalaale cidii Amarkan ka hortimaada.
4. Amrkan u Madax-Banaanaynta ah wuxuu soo baxay 01/04/2013.

Alla Mahad Leh.

((Dr. Yusuuf Dalal Cabdi))

Garsooraha Maxkamada Gobolka Hargeysa

((Abokor Maxamed Axmed))

Kaaliyaha Maxkamada Gobolka Hargeysa.

Jamhuuriyada Somaliland

Maxkamadda gobolka M/Jeex Hargeysa



MGH/DFL/208/012

03/04/2013

Ku: - Taliyaha Qaybta Booliska Bariga =Hargaysa=

Ku: - Hogaanka Hawlaha Ciidanka Booliska =Hargaysa=

Og: - Taliska Ciidanka Booliska JSL =Hargaysa=

Og: - Maayarka Caasimadda Hargaysa = Hargaysa=

Og: - Loo Fuliyeaasha:-

1. Maxamed Kayse Guuleed
2. Khadar Kayse Guuleed
3. Saakin Kayse Guuleed
4. Cibaado Kayse Guuleed
5. Cismaan Kayse Guuleed

Og:- Lagu Fuliye Siciid Cabdi Ismaaciil.

Ujeedo:-Amar Madax Banaanayn Beer ku taala
tuulada Xadhig Xadhig cabirkeeduna yahay
600X25Mt


Maxkamada Gobolka M/jeex Hargeysa

Markay Aragtay: - Gal dacwadeedka fulinta ah ee sumadiisu sare ku xusantahay.

Markay Aragtay: - Arjiga codsiga fulinta ee ay Maxkamadda u soo gudbiyeen loo fuliyeyaashu Kuna taariikhaysan 24/11/2011.

Markay Aragtay: -

Xukunka Maxkamadda
Gobolka ee ay sumadiisu
Tahay
MGH/DML/119/2006 Kaas
oo ay Maxkamada gobolku
ugu xukuntay loo
fuliyeyaasha ay
magacyadoodu sare ku
xusan yihiin,
dhulbeereedka ku yaal
tuulada Xadhig xadhig
Cabirkeeduna yahay
600x25Mt jihooyinkiisu
kala yihiin;



Bari-----B/T ilma kayse Guuleed

Waqooyi -----B/t ilma kayse Guuleed

Koonfur ----- Buur

Galbeed-----Ilma cabdi Ismaaciil Xirsi

Markay Aragtay; -

Xukunka Maxkamadda
Rafcaanka ee ay
summadiisu tahay MRH/D-
MRL/104/2009 EE
08/07/2009 kaasi oo ay ku
ayiday Xukunka
Maxkamadda Gobolka
Rafcaanka iyo Maxkamadda
gobolka.

Markay Aragtay: -

Amarka xooganee fulinta ee
ku taariikhaysan
15/02/012, Taas oo ay
Maxkamada gobolku
Hargaysa ay loo
fuliyeyaasha ugu Fulisay

dhulkaas cabirkiisu yahay,
600x25Mt.



Markay Aragtay: -

In lagu fuliyuhu ka soo
xaadiri waayey dhammaan
fadhiyadii ay maxkamadu
u mudaysay, mudo Shan
bilood laga joogo.

Sidaas daraaded waxay Maxkamadda Gobolka
Hargaysa soo saartay Madaxbannanayntan.

1. Waxaa taliyahan qaybta Booliiska Bariga hargaysa iyo Madaxda kale ee waraaqdani Tooska ugu socoto lagu wargelinayaa in ay maxkamadu u madax bannanaysay loo fuliyeyaasha Beerta ku taala Xadhig-xadhig Beertaas oo cabirkeedu yahay 600x25 Mt Jihooyinkeeduna sare ku xusan yihiin.
2. Sidaa darteed waxay mar labaad idinku wargelinaysaa in loo fuliyeyaashu laga bilaabo manta oo taariikhdu tahay 03/04/2013 xor u yihiin Beertooda sare ku xusan, iibin karaan, hibayn karaan, sifo kasta oo sharci ah u isticmaali karaan.
3. Madax bannanaynta waxy soo baxday isla manta oo bishu tahay 03.04.2013.

((Dr. Xuseen Maxamed Jaamac))

Garsooraha maxkamadda Gobolka M/jeex = Hargeysa=

Fahad Maxamud C/raxmaan

Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka M/jeex =Hargeysa=



MGH/DFL/162/10

Hargaysa, 03/04/2013

KU: - TALIIYAHA SALDHIGA BOOLIISKA IB/KOODBUUR
HARGAYSA

KU: - GUDOOMIYAHA DEGMADA IB/KOODBUUR HARGAYSA

KU: - JARAAIDKA MADAXA BANNAAN EE JSL HARGAYSA

OG: - TALIIYAHA QAYBTA BOOLIISKA GALBEDKA HARGAYSA

OG: - DUQA CAASIMADDA HARGAYSA HARGAYSA

OG: - DHINACYADA DACWADA HARGAYSA

UJEEEDO AMAR XAYIRAAD GURI

Maxkamada Gobalka Hargeysa:


Markay araktay: Galdacwadeedka fulinta ah ee
sumadiisu tahay
MGH/DFL/126/10, kana
dhaxeeyada Kala ah:-

- 1) Loo fuliyeyaal: Cali Cumar
maxamuud iyo (6) kale.
- 2) Lagu fuliyeyaal: Yuusuf Ibraahim
Maxamuud iyo (3) kale.

Ujeedadiisuna tahay Fulin Heshiis
Nootaayo.

Markay Aragtay: Codsiga ay maxakamadda u soo
gudbiyeen loo fuliyayaasha sare
ku xusan kuna taariikhaysan
01/04/2013, ujeedadiisuna tahay

Codsi Xayiraad Guri uu leeyahay
Lagu fuliye: Yuusuf Ibraahim
Maxamuud oo ku yaal Degmada
Ib/Koodbuur.



Markay Aragtay: Qoraalka Maxkamadda Gobolka
Hargeysa ee ku suntan
MGH/DFL/126/10/, ee
14/03/13, ujeedaduusuna tahay
soo cadayn lhaansho guri.

Markay Aragtay: Qoraalka Gudoomiyaha Degmada
Ib/koodbuur Hargeysa ee ku
suntan XMDH/H/D/I/ k/65/13,
ee 16/03/13, ujeedadiisuna tahay
Cadayn Guri, kuna soo cadeeyen
waaxda Ib/Koodbuur inuu ku
qoran yahay Guriga lanbarkiisu
yahay 1020201p27. Yuusuf
Ibraahim Maxamuud.

Markay Aragtay: - Qodobada 293, 294, 295, X.H.M
iyo asbaabaha sare ku xusan
dartood waxay Maxkamada
Gobolka Hargaysa soo saartay
Amarkan.

1. Maxakamada gobolka hargaysa waxay
xayiraysaa Guriga cabirkiisu yahay 18x15Mt
kuna yaala deg.Ib/koodbuur lanbarkiisuna
yahay 1020201p27, jihooyinkiisuna kala
yihiin sidan:-
B/koonfur====Waddo,
W/Galbeed====Dhisme.
Inaan la iibin Karin,la Rahmi karin,La Hibayn
Karin, sifo kale oo sharci ahna loo
isticmaalikarin ilaa amar danbe oo ay
Maxkamaddu ka soo saarayso .

2. Amarkan xayiraada wuxuu soo baxay manta
03/04/2013



ALLAA

MAHAD

LEH

((DR.YUUSUF Dalal Cabdi))
Garsooraha Maxkamadda Gobolka Hargaysa

JAMHUURIYADDA SOMAALILAND



REPUPLIC OF SOMALILAND

MAXKAMADDA GOBOLKA M/JEEX

REGIONAL COURT M/J HARGEISA

MGH

MGH/DFL/63/012

Hargaysa,06/04/2013

Ku: - Idaacada Radio Hargeisa =Hargiesa=

Ku: - Wargeyska Madaxa Banaan =Hargiesa=

Ujeedo;- Naado Xaraash Laba Baabuur No:- 41912
& No:-44913

Maxkamada Gobolka Haragsya iyada oo tixraacaysa
Qoraalka ku Taarikhaysan 13/02/013
ujeedadiisuna tahay Xayiraad Baabuur uu ku kala
qoran yahay labadalagu fuliye ee hoos ku xusan.

Hadaba Maxkamada Gobolka Hargeysa waxay
xaraashaysa labada Baabur eek ala ah:-

Surf No: - 41912 uu ku qoran yahay Rashiid
Ibrahim Naaleeye

Noah No: - 44913 uu ku qoran yahay Shaun
Ibraahim Naaleeye



Sidaas darded waxay maxkamadu mar labaad
naadinaysa xaraashkan labadan baabur si
waafaqsan Qod.398, 401 XHM hadaba cidii
danaynaysa naadinta Xaraashkan waxay kala
xidhiidhi karaan xafiiska Kaaliyaha Sare ee
Maxkamaad Gobolka Hargaysa No:-4427361

Alla Mahad Leh.

((Dr. Xuseen Maxamed Jaamac))

Garsooraha Maxkamada Gobolka M/Jeex

=Hargiesa=

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

MAXKAMADDA SARE

Supreme Court

ل محكمه ال على ا

Tix: MS/GGG/G-51/91/2013

Taar: 09/4/013

KU: GUDDOOMYAHA GOLAHA GUURTIDDA JSL HARGEYSA
OG: Mudane: Maxamed Shire Faarax HARGEYSA

UJEEDDO: Dhaarin Mudane.

Tixraac warqadda Sumadeedu Tahay
Ref/GG/JSL/85/04/2013, ee ku Taariikhaysan
09/04/2013, Kuna Saabsanayd Arrinta Ujeeddada
sare ku qoran.



Haddaba anagoo Aragnay Qod.129aad ee Dastuurka
JSL, wuxuu Mudane, Maxamed Shire Faarax,
Hortayda ku dhaartay Maanta oo bishu tahay
09.04/2013, Saacaduna ahayd 11:10 subaxnimo
dhaartaas oo waafaqsan Qodobka kor ku qoran.

Sidaas Darteed, laga Bilaabo Maanta oo ay
taariikhdu tahay 09/04/2013, wuxuu Mudanahaasi
ka mid noqonayaa Madanayaasha Golaha
Guurtidda JSL.

ALLAA MAHAD LEH.

(Dr.Yuusuf Ismaaciil Cali)

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA SARE EE JSL.

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

MAXKAMADDA SARE

Supreme Court

ال محكمة ل ع لى ا


Tix: MS/GGG/G-51/93/2013

Taar: 09/4/013

KU: GUDDOOMIYAHA GOLAHA GUURTIDDA JSL HARGEYSA
OG: Mudane: Xasan Sh. Axmed Sh. Nuux HARGEYSA

UJEEDDO: Dhaarin Mudane.

Tixraac warqadda Sumadeedu Tahay
Ref/GG/JSL/86/04/2013, Kuna Saabsanayd
Arrinta Ujeeddada sare ku qoran.



Haddaba anagoo Aragnay Qod.129aad ee Dastuurka
JSL, wuxuu Mudane, Xasan Sh. Axmed Sh. Nuux,
Hortayda ku dhaartay Maanta oo bishu tahay
09/04/2013, Saacaduna ahayd 11:10 subaxnimo
dhaartaas oo waafaqsan Qodobka kor ku qoran.

Sidaas Darteed, laga Bilaabo Maanta oo ay
taariikhdu tahay 09/04/2013, wuxuu Madanahaasi
ka mid noqonayaa Mudanayaasha Golaha
Guurtidda JSL.

ALLAA MAHAD LEH.

(Dr.Yuusuf Ismaaciil Cali)

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA SARE EE JSL.

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**
MAXKAMADDA SARE

Supreme Court

ال محكمة ل عليا

Tix: MS/50/013

Taar: 13.4.013

Ku. Taliyaha Salidha dhexe Booliska New Hargeysa
Ku. Taliyaha Qaybta Booliska bariga
Ku. Dhamaan Xafiisyada Nootaayoooyinka
Fashiyadooda
Ku. Gudoomiyaha Degmada G/Libaax
Og. Jaraa'idka Madaxa Banaan

Og. Raadyo Hargeysa.

Og. Damiinal Maal. Maxamed Saciid Ducaale.

Og. Wasaarada Cadaalada JSL Waaxda

Nootaayooyinka

Og. Rafcaansane: - Aw Xasan Sh. Maxamed

Og. Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka JSL.



**Ujeedo: - Amar Xayiraad Guri Lambar 1.Guri File,
No.21600, 2.Gur Gis No.3020201p181 Oo loo
dhigay Damaanad**

Tixraac Arjiga ku taariikhaysan 6/4/013 una soo Gudbiyay Maxamed Saciid Ducaale Kuna saabsan Codsii dhigid damaanada (Rahan) laba Guri lambar G/1-BHM oo uu ku Qoran yahay Maxamed Saciid Ducaale, Sida ku cad xaashida Iibka Ref.02/12 Kuna taariikhaysan 25/10/12, iyo General Receipt No.583424 ee 25/10/2012, laguna qabtay Lacagta kala wareejinta oo dhan.418\$ kuna yaala Xaafada G/Libaax, Cabirkiisuna Dhan Yahay 9x12m iyo Guri Lambar, G/L-M/Xarbi ee uu ku Qoran yahay Maxamed Saciid Ducaale. Sida ku cada Xaashida Iibka Guriga ee Tirsigeedu yahay Ref XNC/H.002 ee ku taariikhaysan 06/11/2012, general Receipt No. 58341 ee 7/11/2012, laguna qabtay lacagta kala wareejinta oo dhan.355\$ oo ku Yaala Magaalada Hargeysa Xaafada C/libaax 14X11M.

Hadaba Gudoomiyaha Maxkamada Sare, Markuu Xaqiiqsada in Dacwad Lambar MRH/DMRL/28/2013 laga soo qaaday Asbaabta Rafcaan Aw Xasan Sh Maxamed Rooble oo ah ninka sheeganaya lacagta dhan 100.960/\$, sida ku cad Qoraalka ku taariikheysan 31/3/013 ee uu ku Soo Rafcaan Qaatay Rafcaanluhu,

Sidaasi Darteed waxaa la xayiray Guriga Cabirkiisu Dhan yahay 9X12m eek u Yaal Magaalada

Hargeysa, Xaafada G/Libaax Jahooyinkiisuna yihiin
Waqooyi = Dhisme

Galbeed = Dhisme

Koonfur = Wado

Bari = Dhisme

Iyo Guri Labaad ee Cabirkiisu Dhan yahay 14X11M.

Jihooyinkiisuna yihiin

Waqooyi = dhisme

Galbeed = dhisme

Koonfur = dhisme

Barri = wado..

Maxkamada Sare

Markay xaqiiqsatay in damaanada (Rahan) uu u

dhigay Guryahaas Rahame. Maxamed Saciid

Ducaale ay tahay Sharci ah isla markaasna ay

Waafaqsan tahay Qod 821.822.823 iyo Qodabada ka

Dambeeya Ee X.M. kuwaasi oo fasaxaya In Qof ku

Damiinyan karo, Rahmi karo hantidiisa Deyn lagu

leeyaha Qof kale. Hantidaasina ay u qoolnaanyso

daynta dhan 100,960\$ inta uu ka gashi baxayaan

damiintuhu. Iyo deyn qabuhuba. Maxkamadu

waxay damiin maalka Hantiile Maxamed Saciid

Ducaale ka xayirtay awoodii Tasaruf ee Guryahaasi

kor ku xusan ee uu rahmey Hantida loo sheeganaya

Maxamed Siciid Ducaale. Una sheeganayo Aw Xasan

Maxamed Rooble oo dhan 100.960/=US. Waxaa la

farayaa Maxamed Siciid Ducaale in aanu, iibin

Karin, Hibeeyn Karin, Rahmi Karin Sifa kalena ku

Wareejin kari Mulkiga Guryahaasi.

Waxa ka Reeban Xafiisyada Nootaayooyinka

Fadhiyadooda in aanay kala wareejin Karin Guriga

sare ku xusan.

Waxa kale oo laga codsanayaa Xafiiska

Garyaqaanka Guud ee Qaranka in uu ku soo Saaro

Faafinta Rasmiga ah.



Waxa la farayaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha
G/Hargeysa, Cidii Jebisana ku soo Oogan Denbiga
ku xusan Qod 308 X.C.G.



Maxkamadu waxay u Cuskatay Xayiraadan Sida
Waafaqsan Qod. 293,294,296, X.H.M.

Alaa Mahad Leh

Garsoorayaasha;-

Yuusuf Ismaaciil Cali.....Gudomiye
C/raxamaan Madar Caraale.....Xubin
Sh. Axmed Xuseen Dirir.....Xubin

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/83/2013

01/04/2013

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeedo:- Diiwaan Gelin Shirkadeed

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada
Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer
Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya
Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay
Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay TAYO-STAR CONSTRUCTION AND CONTRACTING COMPANY, oo ay ku Cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2)(a) Somaliland company Law.

Markuu Arkay: - in ay saamiga Shirkaduu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer No.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu Arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban TAYO-STAR CONSTRUCTION AND CONTRACTING COMPANY, shaqadeedu tahay dhismaha (Construction and Contracting) xarunteeduna tahay Magaalada Boorama, laga bilaabo manta oo ay taarikhdu tahay 01/04/2013.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/85/2013

08/04/2013

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwaan Gelin Shirkadeed

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay HIRSI LTD COMPANY, oo ay ku Cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu Arkay: - in ay saamiga Shirkaduu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer No.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin

Markuu Arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban HIRSI LTD COMPANY, shaqadeedu tahay Ganacsi guud (General Trading) xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo manta oo ay taarikhdu tahay 08/04/2013.



Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/88/2013

15/04/2013

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeedo: - Diiwaan Gelin Shirkadeed

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay GALAD CONSTRUCTION AND CONTRACTING COMPANY, oo ay ku Cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2)(a) Somaliland company Law.

Markuu Arkay: - in ay saamiga Shirkaduu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer No.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin

Markuu Arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban GALAD CONSTRUCTION AND CONTRACTING COMPANY, shaqadeedu tahay dhismaha (Construction) xarunteeduna tahay Magaalada Burco, laga bilaabo manta oo ay taarikhdu tahay 15/04/2013.

Allaa Mahad Leh.


(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL



TIX: - XIG/JSL/89/2013

15/04/2013

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwaan Gelin Shirkadeed

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay OCEANIIC SHIPING AGENCY, oo ay ku Cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu Arkay: - in ay saamiga Shirkaduu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer No.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin

Markuu Arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban OCEANIC SHIPPING AGENCY, shaqadeedu tahay Wakiilnimo Gadiidka Badda (Shipping Agency) xarunteeduna tahay Magaalada Burco, laga bilaabo manta oo ay taarikhdu tahay 15/04/2013.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/86/2013

16/04/2013

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Magac Bedel Shirkadeed

Markuu arkay: - Warqada Codsiga ah ee ay Soo qorteen Mulkiilahayaasha Shirkada ee Ku Taariikhaysan 15/04/2013.

Markuu Arkay: - Warqadda Wasaaradda Kalluumaysiga ee sumadeedu tahay WKKHB/AK/92/13 EE 16/04/2013. Ee ay ku ogolaatay magic bedelka

Shirkadda CEEL DARAAT FISHING
COMPANY.

Markuu Arkay: - Qodobka 22aad ee Somaliland
Company Law.



Wuxuu Diiwaan Geliyey.

In Shirkadda Magaceedu yahay CEEL DARAAT FISHING
COMPANY, kuna diiwangashan Lamberka
XIG/JSL/86/2013, loo Bedelay Magaca AL-KHAYR
FISHING COMPANY, oo xaruntiisu tahay Magaaladda
Berbera.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/90/2013


18/04/2013

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeedo:- Diiwaan Gelin Shirkadeed

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha



Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay TAWFIIQ GENERAL TRADING COMPANY, oo ay ku Cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu Arkay: - in ay saamiga Shirkaduu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer No.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin

Markuu Arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban TAWFIIQ GENERAL TRADING COMPANY, shaqadeedu tahay soo dejinta Bagaashka (import and export) xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo manta oo ay taarikhdu tahay 18/04/2013.

Allaa Mahad Leh.

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/91/2013

23/01/2013

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwaan Gelin Shirkadeed

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay (EAST AFRICA CASING COMPANY), oo ay ku Cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu Arkay: - in ay saamiga Shirkaduu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer No.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin

Markuu Arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka

11aad xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.



Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay
Shirkadda ku magacaaban EAST AFRICA CASING
COMPANY, shaqadeedu tahay Sifeynta Midhicirka
Xoolaha (livestock by product) xarunteeduna tahay
Magaalada Hargeysa, laga bilaabo manta oo ay taarikhdu
tahay 23/04/2013.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/92/2013

25/04/2013

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeedo:- Diiwaan Gelin Shirkadeed

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada
Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer
Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay
Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay
SAWA INTERNATIONAL COMPANY,
oo ay ku Cad yihiin Xubnaha
Shirkaddu, sida ku cad Qodobka
11aad (2) (a) Somaliland company
Law.

Markuu Arkay: - in ay saamiga Shirkaduu waafaqsan
yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer
No.25/2004 Company Act of
Somaliland, saamiyadooduna ay
sugan yihiin

Markuu Arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay
saxeexeen sida uu qabo qodobka
11aad xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay
Shirkadda ku magacaaban SAWA INTERNATIONAL
COMPANY, shaqadeedu tahay soo dajin iyo dhoofin
(Import) xarunteeduna tahay Magaalada Burco, laga
bilaabo manta oo ay taarikhdu tahay 25/04/2013.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka